# Golaha Wakiilladda

## <u>Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka</u>

### *Golihii 5aad ee Wakiillada, Fadhigii 8aad ee Kal-fadhiga 8aad*

***Wakhtiga 10:30* AM** ilaa **12:38 Am**
***Taariikhda: - Isniin 24 June 2024***

**Gudoonka: -** Md. Yaasiim Maxamuud Xiir (Faratoon)

**Quranka: -** Md. Sh. Siciid Sokeeye

**Ajandaha Fadhiga:- Dooda Xeerka Hawl-gabb-ka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda**

**Md: Abdikarin Aadan Cali** ***(2min, 20sec):*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Xeerkani waa xeer marka koobaad leh dabeecad dhaqaale leh, dabeecad dhaqaale haduu leeyahay waxaa ka muuqata in aanu uqornayn sidii ay ahayd waxaa meelo badan ku qoran Guddidu in ay maamulayso maalgashi, maalgashigu nooc uu noqonayo iyo Meesha lagu maalgalinayo kuma jirto habayaraatee waa wax si guud uun looga hadlay.

Kumana jirto halka ay lacaguhu ka imanayaan iyo sida ay ahaanayaan, waxa iimuuqatay in shaqadii oo dhan loo dhaafay Guddida suura galna ma aha in ay iyagu wax walba go'aamiyaan oo iyagu wax walba sameeyaan, waxay doonaan badalaan, waxay doonaan ka jaraan lacagtana sida ay doonaan u maamulaan wax suuragal ahna ma noqonayso.

**Waxay ila tahay Gudoomiye in latatin xaga sharciga ah, xaga dhaqaalaha iyo la talin xaga shareecada** ah dib loogu noqdo lana qodobeeyo lacagtu halkay ka imanayso inta laga jaraayo, qofka shaqaalaha ahi inta uu bixinayo qofka shaqaalaha dawlada ahi inta uu bixinayo iyo lacagaha kale ee laleeyahay waa lagu dari karaa halka ay ka iman karaan iyo halka lagu maalgalinayo, in ay tahay lacag shareecada waafaqsan iyo in ay tahay lacag save ah oo ayna suuragal ahayn in ay lunto.

Gaar ahaan waxaa caalamka lagu maal galiyaa adeegyada ay bulshadu isticmaasho ee waligood joosanin sida biyaha, Telefoonada, Gaaska, meelahaas ayaa lagu maal galiyaa taas oo ah lacag mar walba socota qof walbaana uu isticmaalayo marwalwabana kordhaysa hadhawna lagala soo bixi karo oo aan lumaynin.

**Md: Axmed-yaasiin Maxamed Xassan** ***(2min, 20sec):*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim shir gudoonka, saxaafada Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu mudane Gudoomiye xeerkan oo Guddida arrimaha Bulshadu ka shaqaynayeen sidoo kale Golaha wasiirada xukuumaduna ay soo ansixiyeen, mudane gudoomiye xeerkan manta ina

horyaala ee aynu galnay doodiisa inta Telefoon ee igu soo dhacdey mayara waxa aad looga war warsan yahay xeerkani hadii uu Golaha ka gudbo oo shaqaale waynaha dawladeenu ka war war san yihiin waxa ay ku danbayn doonto xaaladoodu.

Mudane gudoomiye xeerka hawl gabka wadamada reer galbeedka ee dhaqaalaha badan haysta sida maraykanka taariikh ahaan 1945kii ayuu maraykanku bilaabey wey ku adkaatay dadkii shaqaale waynaha ahaa sidii xeerkaasi uu noloshooda ubadali lahaa ee loo xaqsiin lahaa waqti dheer bey ku qaadatay wadamada uk waa wadamada ugu dhaqaalaha badan ee Democratic in badan soo isticmaalayay 80 maadkii bey iyaguna bilaabeen ilaa 90 maadka dhamaadkiisii waxa ku adkaatay in ay shaqaalahooda hawl gabka ah wixii ay xaq u lahaayeen siiyaan inaga duruufaha dalkeena waad ogtahay.

Aabaha qoys dhan maamulaya ee masruufaya mushaharka uu qaato waynu ognahay aabaha ugu badan 3malyan buu qaataa ama shaqaalaha A da ahi sedex malyan bey qaataan marka manta hawlgab lafadhiisiyo xeerku waxa uu siinayaa waxoogaa aad uyar oo percentaj ah kaas oo aan waxba ka tarayn qofka noloshiisii.

Qofka soo shaqaynayay mudo u uku hawl gabo oo 30 kaa sano ee uu Qarankeenu shaqaynayay ee qaranka u adeegayay ee manta da`diisu 65 gaadhay ee layidhaa da`adii hawl gabka ayaad joogtaa ee fadhiiso.

Waxa weeyaan inaga oo ah wadan curdin ah in aynu ka fikirno muxuu ku noolaanayaa qofkaa shaqaalaha ahi ama ta aynu uqoondaynay kiro guri ma ka bixin kartaa, masaariif ma siinaysaa, mudane gudoomiye xeerkan waxaan aamin sanahay in aynaan ka bixi karayn hadii aynu ka doodno oo aynu gudbino in aan dadkaa faraha badan ee shaqaale waynaha aha aynu noloshoodhii aynu meeel cid la` ah aynu dhigayno.

Waxaan soo jeedinayaa ma hayno oo manta dawladeenu ma awoodayso in ay guryo udhisto dadka hawlagabka ah ee fadhiisanaya, ma awoodayso in ay Nafaqada caruurtooda ay bixiso, ma awoodayso in ay waxbarashada caruurtooda ay bixiso.

Waalidka aynu fadhiisino mushaharka kuma noola ee waalidiintu waxay ku nool yihiin Gunada ayay reeraha ku masaarufaystaan, lacagata manta xeerkani siinayaa waxa laga yaabaa in waalidka hal arday fee-gii ka bixin oo secondary dhigta waalidkuna awoodi waayo in uu bishii ka bixiyo.

Markaa xeerarku culays bey leeyihiin yanaan ka fikirin uun xeer baynu ansixinee aynu ka fikirno xeerkani saamayn muxuu keenayaa, shaqaale waynuhu aad bey arintani dareen iyo walaac uga qabaan in uu Golleheena kasoo gudbo, **waxaan leeyahay ama aan soo jeedinayaa in aynu rog-rogno** oo dadka aynu fadhiisinayno mushaharka dawlada kuma noolee Gunada ay helaan bey masaariif ka dhigtaane aynu ka fikirno.

**Md: Maxamed Xassan Siciid** *(5min, 45sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim markaad daraasad aad ku samayso wadamo farabadan, xeerka hawl gabka waa laysraaciyaa shaqaalaha Dawlada iyo kuwa rayidka ahba labadaba xukuumada waxaa ka saaran waajibaad.

Wadamada aduunyadu badan koodu waxa ay isla qaateen in social security wax la yidhaa la sameeyo, hawl gabkana lays raaciyo kuwa private-ka ah iyo kuwa dawliga ahba waajibaad baana xukuumada ka saran, **markaa waxaan soo jeedinayaa in xeerkan la balaadhiyo oo laga dhigo xeerka hawl gabka Qaranka** ee aanu noqon xeerka hawl gabka shaqaalaha Dawlada labadada xeerna lagu lifaaqo ee xeerka shaqaalaha dawlada iyo xeerka shaqaalaha rayidka. Lana sameeyo sanduuqa Horumarka wadamada badan kooduna sidaas ayay isticmaalaan.

Sidoo kale waxaa Aas-aasan oo jira sanduuqa hawl-gabka oo shaqaalaha laga jaro mushaharooyinkooda in mudo ahna laga jarayay, xeerkana waxaa ku qoran in uu ka bilaabmayo marka la dhaqan galiyo wixii hore halkay tagayaan sow ma aha in wixii hore meel lagu hubsado.

**Qodobka 3aad** ee eray bixinta waxaa ku qoran cadayn Da'eed waxa loola jeedaa qoraal kasoo baxay Hay`ad caafimaad oo sheegaysa qofka da`da si waa faqsan xeerka.

Da`da qoraal caafimaad looma baahna ee ay ID baa jira, markaa halkaaana in lagu badalo cadayn da`eed waa in uu sitaa ID sheegaya da'diisa qofka shaqaalaha ahi.

Qodobka 8aad qaab dhismeedka maamul ee sanduuqa, qaab dhismeedka maamul ee sanduuqa marka aynu ka hadlayno waxa ku qoran farqada 3aad Guddida saree e sanduuqa hawlgabka wasiiro, wasiirka wasaarada shaqo galinta, wasiirka wasaarada horumarinta maaliayada, wasiirka wasaarada qorshaynta iyo horumarinta, sanduuqan shaqaale ayaa leh in aan cid matalaysaa oo ka tirsani aanay ka muuqan Meesha, laguna soo qoray wasiiro mashquulsan oo iyaguba wasaaradahooda iyo shaqadooda kuwada mashquulsan, markaa in halkaa qaab dhismeedkaa wax laga badalo oo la isticmaalo, wadamada kale sida ay u dhigeen.

sidoo kale waxaa ku yaala in uu yeelanayo Agaasime fulineed dhanka kale waxaa kutaala in uu yeelanayo Agaasime guud waa labo Qodob oo iska hor imanaya, Guddiyada madaxbanaani agaasimayaal fulineed ayay yeeshaan. Sidoo kale Waxaa xeerkani tilmaamayaa mudada kala guurka ah, oo shaqaalaha laga qaadayo 5%.

**Guud ahaa waxaan soo jeedinaya** in xeerkan dib loo naaqisho oo laga dhigo xeerka hawl gabka Qaranka ee aanu noqon xeerka hawlgabka shaqaalaha Dawlada.

Halkan waxaa ku qoran shaqaalaha iyada oo mudadii hawl gabka aan gaadhin shaqada ka taga waxa uu yeelanayaa intii sano ee uu shaqaynayay sanad walba bil mushaharkeed waa sida xeerka shaqaalaha rayidkuna uu dhigayo, taasi waxay ka badan tahay lacagta hawl gabka ah ee shaqaalaha ka go`aysa waxayna ay ka badan tahay lacagta uu heli doono qofka hawl gab galay, qof iskii shaqada uga tagay 5% halkan ku qorani kuma filna hawl gab, sanduuqa wax cover garaynkarayana kuma filna.

Sidaa darted waxaan soo jeedinayaa in percentka shaqaalaha udhigmaya kor loo qaado isla markaana aan laga jarin shaqaalaha, ee ay lacagtu noqoto in 5% ay dawladu kabto lagu daro lacagta shaqaalaha udhigmaysa si wax ku filan loo helo hawlgabkii hadii kale isma waafaqayso 5% ma cover garayn doonto hawlgabka shaqaalaha inaga oo og tirade shaqaalaha ee hawlgabka galaysa.

Waxaa Iyana halkan ku qoran da'da hawlgabka oo ah 65 sano waad aragteen wadamo badan oo uu buuq ka taagan yahay inagana dhaqaalaheena waynu ognahay 65sano in **70 sano laga dhigo ayaan soo jeedin lahaa.**

**Guntii iyo gabogabadii waxaan soo jeedinayaa in aanu xeerkani aanu bislayn ee uu second reading uu galo isla markaana lawaafajiyo oo laga dhigo xeerka hawlgabka shaqaalaha Qaranka oo dhan**.

**Md: Faysal Yuusuf Jaamac** *(2min, 20sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiyaha, mudanayaasha, shaqaalaha iyo Saxaafadaba dhamaan Asc. Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal Qodobadii aan soo qortay dhamaantood waxaa ka hadlay Xidhibaan Maxamed Xassan, insha allaah waan ta'kiidinayaa oo kaliya, guddida Maamulaysa hawl-gab-ka waxaa lagu sheegay 4-wasiir iyo Gudoomiyaha hay'adda shaqaalaha dhamaantood waxaa masuuliyiin shaqooyin qaranka u haya, waxaana ila haboon in laga dhigo private ama Wasaarad la hoos-geeyo sida wasaarada Maaliyada oo kale, loona qorsheeyo cid u khaas ah arrintan loona sameeyo Agaasime kali ah oo qorsheeya hawl-gab-ka **ayaan soo jeedin lahaa.**

Mudane Gudoomiye waxaa kala oo aan ku dari lahaa in aanay noqon kaliya shaqaalaha dawlada ee hoose, **ee waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo dhamaan shaqaalaha jamhuuriyada Somaliland oo dhan kuwo gaar ah iyo kuwo dawladeedba, ama shaqaalaha qaranka la yidhaa.** Waayo xaq ayuu u leeyahay qofkasta oo qaraka meel uun uga shaqeeyay in uu helo hawl-gab.

Sidoo kale waxaan qabaa in aanay waxan Meesha ku qaran aanay ku filayn shaqaalaha marka shaqada laga fadhiisiyo oo qayskii uu ka soo jeeday ku filaada ama dabara, taasina waxay keeni kaartaa dhibaatooyin kale.

Sidaa awgeed **Waxaan soo jeedinayaa in xeerka aynu inta ka balaadhino una talo badsano,** Sidoo kale waxaan ku raacsanahay Xildhibaan Maxamed Xassan in da'da la kordhiyo waayo dadka hada shaqeeyaa waa ay ka wada wayn yihiin 65jir umana hayso hadiii aynu sidaa nidaa wax kharash ah ee waa in da'da dib loo eegaa.

Ugu danbayn **waxaan soo jeedinayaa in xeerkan aynu akhris danbe la galiyo oo aynaan ku deg-degin si aynu u soo saarno xeer macquul ah ummadana anfaca** waad mahadsantihiin

**Md: Maxamed Jaamac Ismaaciil (Koodbuur)** *(4min, 20sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, marka hore waxaan Doodoodii ku taageerayaa ama aan ku raacsanahay Mudanayaasha kala ah Faysal, Maxamed Xassan iyo Axmed-yaasiin soo jeedimihii ay soo jeediyeen hadii xeerkan la isku raaco.

Waxaan annigu qabaa arragti ahaan, xeerkani ma yahay marka Somaliland Siyaasada ahaan iyo dhaqaale ahaan halka ay marayso wakhtigeeda taagan? Mase yahay Xeer maanta loo baahanyahay?

Wadamada dhaqaalahoodu wanaagsan yahay iyo ka Somaliland ahaan qofka hawl-gal-ka galaya waynu ku kala duwanahay oo qofka Somaliland jooga ee shaqeeyaa waxa uu masuul ka yahay laba reer oo uu ku masruufaa dhaqaalaha yar ee uu qaato, hadaba marka la yidhaa hawl gab ayaad galaysaa oo waxaad qaadanaysaa wax yar oo ka mid ah mushaharkaagii, intee in leeg ayay saamayn ku yeelanaysaa dadkii uu masuulka ka ahaa? Waa saamayn aad u farro badan, maadaama oo cid qaadaysaa masuuliyadii uu hayay aanay jirin. Waana su'aalaha u baahan in wax la iska waydiiyo, inta ayaynaan ku dayay dad inaga dhaqaale buuran oo aynaan ku deg-degin.

Sidoo kale inta badan xeerarka noocan ah waxaa maal-galiya hay'addo dibada inooga yimi oo aan fahansanay dhaqanka sameeyaa iyo noloshay ay dadkani ku nool yihiin, markaa in aynu iska qaadano wax dibada la inagaga soo maanguuriyay waa khalad. Waayo waa inn wadanka dhexdiisa laga cilmibaadhisyo in la qaadi karo xeerkan iyo in kale.

Hadaba xukuumada bixiya hawl-gab-ka waxaa ka jira system-yo kale oo ay wax u bixiyaan hadii aynoqoto waxa la yidhaa social welfare laguna baahi tiro qoyskaa wixii soo gali jiray.

Sidaa awgeed **Waxaan soo jeedinayaa in Xeerkan aan la joojin wakhtigiisii la suurto galin lahaa ama lagaba doodi lahaa,** waxaanan qabaa in ay xukuumada uga haboontahay Xeerkan in ay ka shaqayso sidii shaqo abuur loo samayn lahaa, marka shaqadaa la dheemo ama laga soo boxo in la Xeerka galo hawl-gab-ka iyo arrimaha ku gadaaman,

sidoo kale waxaan qabaa in wakhtigana hada lagu jirro ee ay doorashooyinku inagu soo socdaan in aanay ahayn wakhtigiisii ee waxaan soo jeedinayaa in mudo sanad ah dib loo dhigo xeerkan.

**Md: Cabdirashiid Cabdilaahi Muuse (Cago-wayne)** *(5min, 14sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Mahadsanid Mudane Gudoomiye, Sida aynu ka warhayno Xeerkani waa xeer aad iyo aad u muhiim ah, waana Xeer ay aad uga qayliyeen shaqaalaha dawladu.

Ugu horayn waxaan ku dari lahaa sidaa uu soo jeediyay Mudane Maxamed Xassan in la yidhaa xeerka Hawl-galka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha, waayo shaqaalaha aan ahay dawliga waxaa ina saaran masuuliyan in aynu u hadalno oo intii xeer kale la samayn lahaa xeerkan salka ha loo balaadhiyo ayaan soo jeedin lahaa. Waayo waxaa jira shaqaale u shaqeeya mudo badan oo aan helin xuquuqdii ay ku lahaayeen loo shaqeeyaha.

Inta aan ka akhriyay xeerkani waxa uu u baahanyahay lafo gur badan, xeerkani waxa uu tilmaamayaa in la sameeyo sanduuqa hawl-gabka in kastoo uu hadaba jirray oo uu shaqaynayayay, xeerka waxyaabaha ku qoran waxaa ka mid ain shaqaale mudo 70sanno ah soo shaqaynayay in la yidhi ha la siiyo boqolaal shiling oo wax ay u gaynaysaa aanay jirin.

Runtii waan aaminsanahay in la nasiyo dadkaa waayeelka ah ee inta badan qaranka u soo shaqaynayay, laakiin waxaan loo baahan yahay wixii ay ku fadhiisan lahaayeen oo masaariif ku filan ah, dadkaas oo tacabkoodii oo dhan soo galiyay qarankan. Inta hada la leeyahay ha la siiyo waa gudhiga mushahaharkooda ama (basic salary) oo aynu ognahay waxa ay tahay maanta ama aan ahay wax qof ku noolaan karo sidii mudanayaashii iga horeeyayba ay tilmaameen.

Dhanka kale waxaan aamin sanahay in ay fursad u tahay dhalinyaro faro badan oo bilaa camal ahi ay xaqooda ay qaranka ku leeyihiin ay helaan iyaga oo aan dadka waawayn xaqooda la duudsiyayn.

Waxaa kale oo aan **soo jeedinayaa mudane Gudoomiye in 65aanay suuro gal ahayn** Marka la eego duruufaha dhaqaale ee aynu ku jirno, marka qofku uu galo da'da hawl gabka waxaa Iyana soo kordhaya shaqaale cusub iyo kharash cusub **waxaan soo jeedinayaa in da'ada laga dhigo sidii mudanayaashii iga horeeyay soo jeediyeen laga dhigo 70sanno.**

Ugu danbayntii **waxaan soo jeedinayaa in la yidhii intaas oo xeer ayaa inaga baxay ee waxaa muhiin ah in ay inaga baxaan xeerar qaranka anfacaya, sidaa awgeed waxaan soo**

**jeedinayaa in guddidii Xeerka lagu Cliyo ama Adhog committee loo saaro.** Iyada oo garyaqaanada Goluhuna ay talooyin ka soo bixinayaa xeerka waad mahadsantihiin.

**Md: Mubaarak Xuseen Maxamed (Xeel-dheere)** *(3min, 05sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Mudane Gudoomiye iyo mudanayaa hadii aan is dultaago xeerka hawl-gabka ama pension law-ga waxaan qabaa in Xeerkan ay shaqaalaha qaranka oo dhami ka sinaadaan oo aanay ku koobnaa shaqaalaha dawlada oo kali ah, loona samayn karin laba Xeer, sidaa awgeed **waa in xeerkan lagu mideeyaa shaqaalaha qaranka oo dhan.**

sidoo kale qofka shaqaalaha ee gali doona hawl-gabka xadiga lagaceed ee laga jarri doono waa in la kordhiyaa halka ay kaga qorantahay **%5 waa in laga dhigaa %10 sidii** uu sheegay xildhibaan Maxamed Xassan ayaan ku taageerayaa.

Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa **in da'da hawl galka ee ay ku qorontahay 65 laga dhigo 70 iyo wixii ka sareeya,** Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa **in xeerka la barbardhigo wadamada aynu nolol ahaan isku dhawnahay (life time-ka) ee waa in aan la eegin wadamada aynaan isku lif time ahayn.**

Ugu danbayn waxaan soo jeedinayaa **sidii mudanayaashii iga horeeyay soo jeediyeen in Xeerkan la soo mariyo latalin sharci** iyada oo laga eegayo dhinaca financial value-gu uu leeyahay, sidoo kalana deegaan Ahaana loo eego.

**Md: Siciid Jaamac Xassan** *(10min, 53sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, mudanayaasha, shaqaalaha saxaafada dhamaantiin asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatuhu, ugu horayn mudane Gudoomiye Anniga oo ku raacsan qodobo badan xildhibaanadii iga horeeyay in xeekan la balaadhiyo oo aan shaqaale dawladeed oo kali ah aan lagu koobin ayaan qabaa.

aniga oo ogsoon shaqada balaadhan ee shaqaalada Dawlada iyo shaqaalaha kale ee qarankuba u hayaan qaranka ee naf hurnimada leh, iyo dedaalka ay samaynayaan markasta iyada oo ay jiraan duruufo badan sida inaanay helin mushahar ku filan, sidoo kalena uu jiro hal xeer oo la yidhaahdo xeerka shaqaalaha dawlada jsl kaas oo aan lagu dhiqin shaqaale badan oo qaranku leeyahay kuwaas oo aan loo samayn xeerar kale oo u gaar ah wali, waxa muhiim ah in shaqaalaha kala duwan ee qaranka oo dhan lagu dabaqo xeerka oo aan lagu dabiqin kaliya shaqaalaha dawlada ee la simo shaqaale weynaha qaranka ee isku xuquuqda ah. Wax diidaya in la simo oo ay xaq wada helaan shaqaalaha qarankuna ma jiraan ee waxa inagu waajib ah in aynu ilaalino sinaanta, mana jiro wax kala fadilaya qofka shaqaalaha ee jooga golaha wakiilada ee mudada dheer joogay iyo qof wasaarad ka shaqeeya, ma jirto sabab midna xaq loo siiyo midna aan loo siin wax diidaya in xeerka lagu wada xusaana ma jirto.

**Sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in la saxo qodobadan:**

1) Waxaan soo jeedinayaa in hordhaca qodobka 1aad ee magaca xeerka laga dhigo: Xeerka Xaqsiinta iyo hawlgabka shaqaalaha Dawlada Jsl, baarlamaanka labadiisa gole, iyo shaqaalaha hay'adaha madaxa banana.
2) Qodobka 4aad xadka adeegsiga xeerka waxaan soo jeedinayaa in faqrada 1aad laga dhigo( xeerkan waxaa lagu maamulayaa dhamaan shaqaalaha dawlada ee lagu maamulo xeerka shaqaalaha dawlada,shaqaalaha kale ee golayaasha baarlamaanka iyo haayadaha madaxa banaan( taas macnaheeduna maaha in shaqaalaha labada gole la hoos gaynayo haayadaha shaqaalaha dawlada, balse waa in iyaguna ay helaan xaqa hawl gabka iyo xuquuqaha kale ee shaqaalaha la midka ahi ay helaan, maadaama oo ay yihiin laba shaqaale oo qaranka uun u wada shaqaynaya, waa inay labaduba helaan xuquuq isku mid ah, hadii aynu nidhaahno qofka 30 sano kasoo shaqaynayey baarlamaanka jsl yuu yeelan wax xuquuq ah, mid wasaarad 10 sano joogayna hala siiyo waxay noqonaysaa cadaalad daro iyo sinaan la aan.
3) Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in qodobka 4aad faqradiisa 2aad loo dhigi sidan; xeerkan waxa ka reeban in lagu dhaqo shaqaalaha dawladaha hoose iyo shaqaalaha aan rasmiga ahayn ee kumeel gaadhka ah, Lagana saaro agaasimayaasha guud.
4) Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in qodobka 4aad faqradiisa 3aad oo sheegaya in xeer nidaamiye gaar ahi sheegayo nidaamka hawlgabka iyo xaqsiinta iyo qiimaynta in gabo ahaanba meesha laga saaro, oo inagu aynu ku sheegno xeerka sida xaqa loo siinayo si aanay u dhicin in qof ikhtiyaarkiisa ku saleeyo xeer nidaamiye oo siduu doono uu u dhigo, waa shaqadeenii sax maaha in xeerka laga waayo nidaamka xaqsiinta magicii xeerkuna yahay xeerka xaqsiinta. Waa awoodeenii oo cidkale aynu u wareejinay hadaynu nidhaahno xeer nidaamiye ayaa lagusoo saarayaa waxkasta.
5) Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in qodobka 4aad faqradiisa 4aad laga saaro dadka aan lagu dhaqayn agaasimayaasha guud, sababta oo ah agaasimayaasha guud sida ku xusan 26 aad ee xeerka shaqaalaha dawlada jsl waa shaqaale dawladeed oo la mid ah shaqaalaha kale, marka ay ka tagaan xilkana ka mid noqonaya shaqaalaha dawlada, hadii aynu xeerkan ka reebnana waxay khilaafaysaa xeerkii aynu hore usoo saarnay ee shaqaalaha xeer LR 97/2022.
6) Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in la saxo qodobka 8aad oo sheegaya qaab dhismeedka maamul ee sanduuqa lagama dhigo gudida sare ee maamulaysa sanduuqa shan xubnood oo ka kala imanaya
   - laba xildhibaan oo ay soo magacaabayaan labada gole
   - Wasiirka maaliyada
   - Gudoomiyaha haayada shaqaalaha

- Xubin sharci yaqaan ah oo ka socota garyaqaanka guud. Waxana aan soo jeedinayaa in dhamaan wasiirada kale ee xubnaha laga dhigay laga saaro si looga hor tago in dan gaar ahi timaado.

7) Qodobka 9aad waxaan soo jeedinayaa in laga saaro faqrada 5aad oo sheegaysa in gudidu la talinayso agaasimaha guud ee maamul, sababtoo ah gudidii aynu siinay awooda maamul iyo goaan gaadhista hadana waxay la talinayaan agaasime waa mid iska hor imanaysa.

**Waxyaabaha loo baahan yahay in lagu darro xeerkan oo lagu soo kordhiyo qodobo ka hadlaya arimahan:**

1. Qodob odhanaya sababaha uu qofka shaqaalaha dawlada ahi uu xaqiisa ku waayi karo sida hadii uu dhex galo arimo siyaasadeed oo uu shaqadii qaranka ee loo igmaday kaga mashquulo arimo siyaasadeed iyo dano xisbi in uu waayo xaqii hawgabka, sababta oo ah agaasimaha guud ee xil hayey 5 shan sano mudadaas oo qaranka xilka u hayeyna ku mashquulay siyaaasad iyo wax aan qaranka waxba u tarayn waxaan soo jeedinayaa in aan wax xuquuq ah la siin kana mudnayn qaranka.
2. Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in xeerka lagu daro in qofka shaqaalaha ahi uu ku waayi karo xaqiisa hadii uu ku kaco musuqmaasuq, ama uu jabiyo xeerka shaqaalaha oo la anshax mariyo.

## *Golihii 5aad ee Wakiillada, Fadhigii 10aad ee Kal-fadhiga 8aad*

***Wakhtiga 10:37*AM** ilaa **11:29 Am**
***Taariikhda: - Axad 30- June- 2024***

**Gudoonka: -** Md. Siciid Mire Faarax

**Quranka: -** Md. Sh. Siciid Sokeeye

**Ajandaha Fadhiga: -**

- **Ansixinta Xeerka Ciidanka Qaranka oo Madaxweynuhu soo celiyay isagoo wax ka badel ku soo sameeyay.**

- **Dooda Mashruuc sharciga Hawl-gabb-ka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda Maalinta 2aad**

**Gudoonka: -** Fadhigu wuu inoo furan yahay, waxa maanta ina horyaala laba ajande oo kala Ansixinta Xeerka Ciidanka Qaranka oo Madaxweynuhu soo celiyay isagoo wax ka badel ku soo sameeyay iyo doodda Xeerka Hawl-gabka iyo xaqsiinta oo hore inoogu socotay inaynu sii wadno.

- **Ansixinta Xeerka Ciidanka Qaranka oo Madaxweynuhu soo celiyay isagoo wax ka badel ku soo sameeyay.**

**Gudoonka: -** Fadhiga waxa fadhiya 45 Mudane, Xeerka Waxa ogolaaday 35 Mudane oo ah soo jeedintii Madaxweynaha, waxa diiday 2 mudane, waxaana ka aamusay, 7 Mudane, aniguna maan codayn, sidaasuuna ku ansaxay Wax ka badelkii Madaxweynaha ee Xeerkii Ciidanka Qaranka.

Waxaynu bilaabanaynaa Dooddii Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha, waxa qoran Mudanayaal badan, waxaana ku soo dhawaynayaa oo ugu horeeya Md. Xuseen Ismaaciil, mudane ku soo dhaw doodda Xeerka.

**Md. Xuseen Ismaciil Jaamac** *(1min, 02sec):* Gudoomiye waad mahadsan tahay, Xeerka hawlgabka shaqaalaha dawlada doodii hore ee Mudanayaasha waxa loo badnaa in akhris labaa la galiyo xeerkan oo waxyaabo badan qabyo ka yihiin, anigu wuxuun baan ayidayaa oo taageerayaa in akhris labaad la galiyo xeerkaas.

Sideedaba somalildu retirement-gu wuu ku soo horeeyaa oo waxa weeye somalida xaga hore ayuu kaga jiraa, qofku isagoo 40 jir ah ayuu retirement ku jiraa, markuu 70 iyo 80 jir gaadhono shaqu bilaabaa, marka waxaan odhan

lahaa xeerkaas dib u eegis dambe ha lagu sameeyo ama akhris labaad. Waad mahadsan tiihiin Gudoomiye.

**Md. Axmed Cabdi Ibraahim (Timo-jilic**) *(6min, 04sec):* Bismilaahi, Mudane Gudoomiye, Mudanayaasha Golaha Wakiillada, Shaqaalaha iyo Xoghayah Guud dhamaan waad salaaman tihiin. Hawl-wanaagsan weeye iyo waajibaad aynu gudanayno in badanina gudatay, qayb ka mid ahna ay u hadhsan tahay.

Anigu dhawr qodob baan ka taabanayaa Xeerkan, Xeerkani wuxuu u baahan yahay kabme, kabmaha uu u baahan yahay waxa weeye data dhamaystiran, data-daas waxa ka mid ah, hay'ad shaqaale hadeer bay jirtaa, madaama hay'addaas shaqaaluhu jirto, waxay qaabilsan tahay shaqaalaha xuquuqdooda, mushaharaadkooda, ilaalinta xuquuqdooda, hawl-gab iyo waxyaabahaas oo dhan.

Madaama waxaas oo dhan xafsiiskaasi uu qaabilsan yahay, sabab gudi kale loo sameeyo, madaama xeerkani uu aassaasayo gudi kale, anigu waxaan isleeyahya macneheedu waxa weeye xafiiskii hay'adda shaqaalaha qaranku ma qaban karo oo waajibaadkaas wuu gudan kariwaayay bay ka dhigan tahay. Mar walba inaynu ilaalino baa fiican hay'ad kasta shaqaalaha jooga inay shaqaale hawshoodii gudan karaya, inay noqdaan kuwo aqoonteedii leh, inay noqdaan dad xasilin karaya hadii sir qaran ku jirto iyo haday waajibaad iyo documentation tahayba.

Golaha waxaan u soo jeedinayaa inuu xoog uga fikiro oo is waydiiyo sababta aynu hay'addii hay'ad kale uga dul samaynayno maxay tahay. Sanduuq baa laga hadlay hawl-gabka ah, sanduuqa hawl-gabka qodobada aynu u baahanahay ee muhiimka ahi waxa weeye, hay'addii shaqaaluhu warbixin ahaan ha ku soo gudbiso ama inagu aynu isweydiino ka gole ahaane, xaqiiqada meesha taal waxa weeye hay'addii shaqaalaha inaynu ka helno warbixin sugan oo ah Liiska shaqaalaha qarankani intuu yahay, inta ku jirta ee liisgaraysan, sannadka inta hawl-gab gaadhaysa ee 65 jir noqonaysaa si aynu xadiga aduunka sanduuqa ku dhacaya ee aynu sannad walba u qorshayno inta ay tahay in xuquuqdoodii halka looga saaro.

Xeerku waa inuu waxyaabo sayntifik ah taabanayo si aynu uu noqdo oo (forecasting) saadaal sax u garan karno shaqaalaha dawladu intuu yahay, sannadkii celcelis ahaan inta la qaadanayo oo la odhan karo shaqaalaha dawlada sannad walba intaas oo percentage baa hawl-gab noqonaysa.

Dabcan hay'addaha ay ka imanayaan way kala duwan yihiin shaqaalahaasi, marka sannadkan iyo sannadka ku xiga la sii hayo data-da inta hawl-gab noqonaysa waa in la sii carbiyaa dadkii dadkaas badeli lahaa si aanay hadhaw vacuum u soo bixin, marka xeerku waa inuu meelo badan oo sidaas ah taabanayo, xeerka meelahaasi way ka maqan yihiin.

Hadii laga maarmi waayo agaasin ka mid ah hay'adda shaqaalaha, maadaama ay iyadu xuquuqihii hayso, liiskii shaqaalaha hayso, ilaalintoodii ay hayso, shaqaalayntoodii iyo diiwaangalintoodii ay hayso, waxa kaliya ee soo kordhayaa waa sanduuqa iyo ilaalinta lacagta hawl-gabka, sidaa awgeed, anigu waxaan soo jeedinayaa in agaasin ka mid ah hay'adda shaqaalaha ay noqoto waaxdani.

65ka hay'addood ee dalkani leeyahay ee jira, shaqaalaa ka wada shaqeeya, hawl-gabkuna sannad walba shaqaale ayaa hay'addahaas ka imanaya, waa inaynu samayn dad loo sii tababaro dadkaas, qodobka labaadna waa xuquuqdoodii oo la diyaariyo.

Waxaynu u baahanahay inaynu garano percentage-ka xukuumadu ay tahay inay ku darto, xeerkan waxa ku cad in 5% qof shaqaalaha laga qaadayo, qiyaastii hadaynu nidhaahno waa 30 kun shaqaalaha dawladu waxa inoo soo baxaya hadii la yidhaahdo bil walba mushaharkeed 5% si walba grade-ku ha u kala duwanaadee, waxaasi amount ma u noqonayaa, su'aasha meesha taal waxa weeye xuquuqdii miyaa laga siinayaa qofkii? Marka waxaynu u baahanaya in sanduqa 5% ay hay'adda shaqaaluhu inooga waranto ama shir-gudoonku waraaq u diro oo ay iyagu inooga soo jawaabaan.

Sidoo kale percentageka Miisaaniyada qaranku inay sugnaato oo lagu kabayo halkaa ilaa wakhtiga dheer oo iyana in xeerkani taabto baynu u baahanahay. Aad baan idin salaamayaa, waan idinku dheereeyay, WSC.

**Md. Maxamed Abiib Yuusuf** *(5min, 01sec):* Bismilaahi, Gudoomiye waad mahadsan tahay, anigu xeerka gudihiisa u dhaadhici maayo, laakiin waxaan rabaa inaan xeerka si guud, anigoo xiliga aynu ku jirno eegaya inaan hadalo guud ka idhaahdo.

Gudoomiye Xeerka Hawl-gabka, xeerarka wakhti baa loo eega xiligay imanayaan inuu yahay wakhti ku haboo ama macquul ah, wakhti kala guur ah oo doorasho

ayaynu ku jirnaa, runtii wararka aanu helayno waxa ka mid ah inay tahay waxyaabo is-badelka looga faa'idaysanayo, sababta xiligan xeerka loo keenayna ay tahay oo la rabo in shaqaalo badan oo aan si fiicin loo hubinin inay wakhtigii hawl-gabka ay gaadheen hab caadifadaysan oo degdega shaqaalaha looga saaro, isla markaana kuwo kale oo cusub lagu soo daro oo lagu soo badalo, dad ilaa 3 kun ku dhaw buu saamaynayaa,

Gudoomiye marka hore waxaan soo jeedinayaa, Xeerkan inaynu kala-fadhiga dambe ee kan ku xiga hadii dawlada joogta ay soo noqoto iyo hadii mid cusub ay timaadoba aynu xiligaas guda galno, sababtoo wuxuu u baahan yahay in la darso, wuxuu u baahan yahay in Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalah loo yeedho, in wasaaradaha laftigooda inagu warqad u dirno oo nidhaahno intee in le'eg oo tiro hawl-gab ah oo aan shaqayn karayn baa wasaarada waxbarashada joogta, intee in le'eg baa waa wasaarada caafimaadka joogta, intee in le'eg baa goleheena joogta.

Sidoo kale, Xeerka qaranka ee hawl-gabku kan rayidka ah ee hay'addaha gaarka loo leeyahay ka shaqeeya iyo kan shaqaalaha dawlada u shaqeeya labaduba xaq bay leeyihiin muwaadiniintu inay wakhti ay ku nastaan helaan, laba sababood baana shardi u noqonaya, mid waxa weeye inuu xeerkaasi is-raaco, midina waxa weeye waxa la siinayo qofka lacagta meesha ku qoran waad la yaabaysaa markaad eegto lacagta loogu talagalay inay ku noolaadaan, qofka milyan somalilnad qaadanayay marka hawl-gab la galiyo lacag ku filana aan la siin dee wuu bakhtiyayaa.

Marka waxay ila tahay wakhti xiligan aynu ka dhaqaale roonahay, loo diyaariyay nidaamkii maaliyadeed dadkaasi lacag ku filan ay ku heli lahaayeen in la hwl-galiyo, sababta aan loogu degdegi karin oo aan baahi loogu qabina xafiis kasta oo dawladeed shaqaalihii dawladu wuu is-dul buuxaa, iminka hadii baahi jirto oo la leeyahay xafiisyadii waxay u baahan yihiin shaqaale, tusaale ahaan iminka Goleheena, hadii inagoo 50 shaqaale ah haysanay ay 25 dad waawayn noqdaan oo aan shaqayn karin, baahi baa inagu khasbaysa inaynu hawl-gab intaynu galino shaqaale cusub qaadano, laakiin hadii la is-dul fadhiyo oo xafiis walba boqolaal inan oo bilaa camal ahi is-dul fadhiyaan.

Runtii dadka loo baahan yahay waa dadkii shaqada lagu soo bilaabay nidaamka tabaruca dawladnimada, waa dadkii xafiisyada aassaasay, waa dadkii waaxyaha xafiisyada sameeyay, waa dadkii professional-ka ahaa ee ka hadhay duruufihii dhacay, dadkaas ayaa la doonayaa in xiliga doorashada looga faa'idaysto siyaabo

siyaasi ah, Golahan aynu joogno archives-kiisii ilaa maalintii la aassaasay way taalaa, rag baa xafiiska archives-ka sameeyay, rag baa maaliyada iyo xafiisyada kale sameeyay, hadii kuwaas laba bilood doorasho dhexdeeda aynu meesha ka saarno inaynaan xaq soorin.

Gudoomiye, markaa waxaan soo jeedinayaa adigoo mahadsan xeerkan in kal-fadhiga dambe marka dalka xaaladiisu dhinac u dhacdo inaynu galno oo gudi loo saaro la soo maro Gobolada iyo xafiisyada, maxaa hawl-gab ah, dadka la tiro koobayaa intay le'eg yihiin eegno, inaynu eegno lacagta loogu talagalay ma loo yahaa, maxayse u taraysaa lacagta loo qoray hawl-gabka oo kirooyinka ma ka bixinaysa, bariiskooda ma bixinaysaa, ciyaalkii ma ka koreen xataa, $32 baa la yidhi waa la siinayaa lacag ahaan, $32 dollar waa laba koob oo shaaha dee.

Marka Gudoomiye waxaan soo jeedinayaa in xeerkaas si fiican loo soo hagaajiyo, kal-fadhiga dambena la keeno. Waad mahadsantihiin.

**Md. Sh. Siciid Maxamed Ismaciil** *(4min, 06sec):* Waxaan jecelahay in marka hore nidaamkan hawl-gabka waa nidaam asalkiisu uu soo jeedo diinteena Islaamka cidii u horeysay ee samaysanaya wuxuu ahaa Cumar Binu-khidaab, isagoo maalin suuqa maraya ayuu arkay nin Yuhuudi ah oo itaal daran oo dawarsanaya, markaasuu yidhi maxaad u dawarsanaysaa yuhuudi baan ahay dadkaan ka urursanayaa si aan jisyada igu waajibtay isaga bixiyo, marka Cumar Binu Khidaab wuxuu yidhi maaha markaad xooga lahayd inaanu kaa qaadno jisyada kaana tagno markaad daciif noqotay, dabadeedna baytul-maalka ayuu u amray in laga siiyo macaash ku filan oo ka kaafiyo inuu dadka wax waydiiyo.

Nidaamkan hawl-gabku waa nidaam ujeedadiisu tahay in qofka shaqaalaha ahaa markuu gaadho da' mucayan ah oo awoodiisii hoos u dhacdo inuu shaqadii ka fadhiisto dabadeedna la siiyo wuxuu isaga qoyskiisu si fiican ugu noolaanayaan, sidaa darteed, nidaamkeenani nidaam intaas si wanaagsan u fulinaya maaha, waxaana ku raacsanahay xildhibaanadii iga horeeyay sida Xuseen iyo Maxamed Abiib iyo Timo-jilic inaynu u baahan inaynu ku samayno daraasad aad u waafiya oo balaadhan, sababtoo ah 1988kii meelahaas ayuu Jarmalku isku dayay inuu u sameeyo shaqaalihiisa nidaamkan ilaa iminka saacadaas aynu joognona muu sal dhigan.

Marka inago ka faa'idaysanayna xuquuqda diinta islaamku ay siisay qofka muslimka marwalba heerka uu joogo, isla markaan diirada u saarayna heerka uu

joogo dhaqaaleheenu, is wanaagsan uga baaraan dagayna sannadkii imisaa hawl-gab noqon kara shaqaaleheena, maxaase shaqaale aynu u baahan karaynaa, isla markaana siinayna ahmiyad gooniya dadkii ka soo shaqeeyay dalkan 1991kii ilaa maanta ee iyagu soo dhisay xafiisyada maanta ay dawladu ku shaqayso oo intooda badan wakhtigaas faraha badan ay soo shaqaynayeen, iyadoon loo xisaabin intii ay soo shaqaynayeen laga soo qaaday labadii kun iyo meelahaas, inaynu dib ugu noqono sidii aynu ugu xaq siin lahayn.

Marka waxay ila tahay Gudoomiye adigoo mahadsan inaynu arrintaas si balaadhan u eegno oo kal-fa/dhiga dambe u dhigano, isla markaana Gudidda shareecada la siiyo doorkeeda si ay uga ciyaarto xalaalnimada sanduuqa hawl-gabku wixii maal-galin ah ee uu samaynayo oo beeca ka soo baxa uu noqonayo kan la siinayo dadka hawl-gabka ah, inay noqdaan lacag lagu maal-galiyay meelo xalaal ah oo aan xaaraan ahayn si dhamaanteen aynu u wada noqono xalaal quutayaal. Waad mahadsantihiin.

**Md. Axmed Yuusuf Guruuje** *(4min, 19sec):* Marka hore Xildhibaanadii uu ugu horeeyay Maxamed Xasan ayaan la qabaa soo jeedintoodii ay xildhibaanadu u badnaayeen ee ahayd in Xeerkan hawl-gabka Shaqaalaha Dawlada lagu daro oo lala mataaneeyo shaqaalaha rayidka ah, sababtoo ah, shaqaalaha dawladu waxay ku shaqeeyaan xeerkii aynu halkan ka ansixinay ee Xeerka Shaqaalaha Dawlada, shaqalaha kale ee wadankuna wuxuu ku shaqeeyaa xeerkii Shaqaalaha Rayidka ah, labaduba xuquuqood iyo labada nidaam ee labada shaqaale waa isku mid oo saacado isku mid ah bay shaqeeyaan, fasaxyo maalmo fasax qaran oo isku mid ah bay leeyihiin, gunada iyo habeen dhaxa waa iskaga mid, hase yeeshee waxa aad u dulman oo dulmi aad u badan ka jiraa shaqaalaha aan dawladliga ahayn ee rayidka ah, kuwa dawladu tamartay doontaan ha yeeshaane 11 maalmood ee fasaxa qaran ah way helaan, saacado dheeraada ah haday shaqeeyaan gunay helaan, laakiin shaqaalaha rayidka ah waxa loogu shaqeeyaa sida qalabka oo xata 18ka may way shaqeeyaan, habeen iyo maaliin way shaqeeyaan.

Waxaad arkaysaa nin 80 sannadood hay'ad u shaqaynayay wax xuquuq ahna aan lahayn, bari dhowayd waxa la sameeyay Gudidda dacwada shaqaalaha oo hoos tagta Wasaarada Arrimaha Bulshada, laakiin shaqaalaha dawladu meel uu ka dacwood malaha oo isagana halkaas dhib baa ka haysata.

Marka waxaan odhan lahaa labada xeer ha la mataaneeyo oo Xeerka hawl-gabka ha laga dhigo shaqaalaha mid dawli ah iyo midaan dawali ahaynba, ilayn halw-gabku waa darajo isku mid ahe. Tan labaad waa in la sameeyaa komsihan madax banaan ooh awl-gabka oo qudha qaabilsan, hadii shaqaalaha hawl-gabka aynu raacino hay'adda shaqaalaha, dee hay'adda shaqaaluhu waa halkii laga hawl-gabayay ee xukuumada u qaabilsanayd shaqaalaha, waxaana halka ku lumaysa xuquuqdii dadka hawl-gabka ah, hadii aynu wasaarada shaqada raacinona, wasaarada shaqadu dee waa xubin ka mid xukuumadu waxa laga yaabaa in shaqaalaha hawl-gabka ahi halka waxba ka waayo, marka waxa wanaagsan Komishan madax banaan oo sida gudidda xuquuqal Insaanka qaranka oo kale ah aynu samayno oo shaqaalaha aan dawliga ahaynina hawl-gabkiisu siduu u helayo ka shaqayso, sanduuqa dhigaalka ah ee shaqaalaha dawladana maamusha, xeerkii iyo nidaamkiina ku ilaalisa waa in la helaa.

Sidaa darteed, waxaan ayidaya oo aan adkaynayaa in xeerkan oo ah mid xuquuq jidayna loo saaro gudi farsamo yaqaan ah oo khubaro golaha ka madax banaan ku jirto, arrimaha shaqaalahana taqaana, maadaama waddankeena ururo shaqaale aanay ka jirin oo xuquuqda shaqaalaha difaaca, waa in goluhu qaata la-taliyayaal arrintaas inagala shaqaysa, gudi Xildhibaano oo koobana loo saaraa, Xeerkan aad uga baaraan degnaa, maxaa yeelay Xeerkani wuxuu ku dhisan yahay guud ahaan arragtidii xukuumada, arragtidii shaqaalaha ka maqan, shaqaalahana inaga ka wakiil ah oo waa shacab waynihii ina soo doortay qayb ka mid ah.

Marka inagoo afkii shaqaalaha ku hadlayna oo xuquuqdoodii matalayna waa inaynu intay tabayaana ugu darnaa, shaqaalaha dawlada intanaa loo soo qaadaye shaqaalihii kale aynu inagu u soo qaadnaa, shirkadaha waxa ka jira hadaad aragtaan waa xaalad gumaysi ah oo kale, markaa waa inaynu shaqaalahaas kalen u samaynaa xuquuqdaas hawl-gabka, intaas ayaan ku soo koobayaa, waad mahadsan tihiin.

**Md. Saleebaan Axmed Carab** *(5min, 09sec):* Shir-gudoonka iyo Xildhibaanadaba waan salaamayaa. Runtii intaan odhan lahaa Xildhibaanadii iga horeeyay baan ku raacsanahay oo yidhi, waa uun sii ayidayaa uun.

Xeerkani waa xeer culus oo aynaan hore u lahayn, mar hadii aynu nahay wada xeerkan oo kale aanu hore uga jirin oo markii ugu horeysay la samaynayo waxa haboon meelo badan loo eego.

Tan koowaad ee ay hoos imanaysaa waa qofkan hawl-gabka ah xuquuqda uu yeelanayo marka uu hawl-gabo inay meel wax ku diyaar ah oo uu ku qanci karo oo loo habeeyay, miisaaniyad sanduuq rasmiya ku jiri karta waa inay noqoto, waana dareemaysaa oo hawl-gabku wuu badanayaa madaama iminka ka hor la samayn, dadka hawl-gabka ahna hadaan hore loo samayn hadaynu 70 ama 65 nidhaahno waxay ila tahay inaan laga yarayn karin marka xaaladeena la eego, dadka 70 jirka ah ee iminka shaqaynaya ee iskala rafanaya hawshiisaas dee aad bay u badan yihiin, mar haday sidaas tahayna in loo diyaariyo oo loo habeeyo halkii ay ku wareegi lahaayeen oo horta la isku hawlo miisaaniyadii iyo sanduuqii iyo hay'addii madaxa banaanayd ee hawshooda markay hawl-gabaan maamuli lahayd waa inay diyaar u tahay.

Sidaas la sheegay waa laba shaqaale, shaqaalaha dawlada iyo shaqaalaha rayidka ah, shaqaalaha dawladu iyagu dawlad bay u shaqaynayeen oo tiradooda iyo xogtooda si toos ah baa loola socda, waxa intaas ka badan oo shaqada ugu badan oo umadu haysaa waa rayidka ah weeye, private-ku waxay u dhigaan ninka u shaqaynaya laba qaybood weeyaano dadka ugu badan ee dabaqada hooe iyo dabaqada dhexe waxba looma diiwaangaliyo, intaas uu shaqaynayo wixii Ilaahay kala siiyo uun bay kala qaataan, maalinta uu doonan shaqada wuu ka joojiya oo sidaasay ku kala dhaqaaqaan.

Qaybta sare ee shirkadaha waawayn ayaa dhowaan waxay u bilaabeen inay xuquuq siiyaan, xuquuqdaas ay siiyaan inta ay u shaqaynayaan uun bay siiyaano marka wakhitigu ka dhamaado isagoo hawl-gaba gaadhin ayuu ka tagaa.

Marka hadii la yidhi ha la isku lamaaneeyo labada shaqaale, in la waajibiyo oo ama iyaga loogu waajibiyo inay xuquuqda hawl-gabka iyaga ku leeyihiin iyo in dawladu kala soo wareegto oo hay'adda shaqaaluhu soo liisgarayso oo dadkaas hawl-gabay ee shirkadaha gaarka loo leeyahay ah iyo kuwii xaga dawlada ka hawl-gabayba intay isku soo habeyso inoo soo gudbiso, ilaa la soo gudbiyo oo miisaaniyada aynu samaynano uun bay ku jirtaa hawlahaniye aynu marka isku qaabayno haday u badanayso iyo haday u yaraanaysoba oo halkaa ugu sameyno.

Mar hadii qofka shaqadiisu hawl-gab yeelanayso waxay ila tahay in loo eegi doono intuu shaqaynayay inay saamayn ku yeelato, waayo hawl-gabku wuxuu inta badan ku xidhmaa haduu doonayo inuu sii scodo in qofka intuu shaqaynayay wixii laga jaray ee meel loo dhigay ama loo ururiyay odoros ku habaysan uu marka dambe ee hawl-gabkana halkaas xuquuqdiisa uu ku yeelan doono, wax

markuu xooga lahaa laga jaray oo sanduuqa ugu dhacay inuu marka uu hawl-gabo qaadanayo.

Marka waxaan soo jeedin lahaa, hawshan iminka ina hortaal sidaas ay inoo hortaalo inaynaan kaga dhamaan karayn, In cilmi-baadhista iyo cidda ay khusayso si dhiibli ah loo baadho dadka hawl-gabka noqonaya ee labadaas hay'addood ee shaqaalaha dawlada iyo kuwa rayidka ah la isku soo habeeyo, inaynu marka inaguna marka wixii dhaqaaleheena aynu isla eegno oo marka go'aanka wada gaadhno, taasina waxay ku suurtagalaysaa in wakhtigiisa la siiyo oo aan iminka lagu degdegine meel aynu hubinay u samayno oo ku ogaano, hubinteedana aynaan ku degdegina ka baaraan degno. WSC.

***Gudoonka:-*** Mudane Saleebaan Carab wuu mahadsan yahay, mudanayaashii doodda is qoray way dhamaadeen, fadhigana waynu xidhanaynaa, mudanayaal waxaan rabaa inaan laba kalmadood idhaahdo, Mudanayaal Xeerku waa xeer muhiim u ah qaranka, sidaad ka war qabtaan waxa jiifa dad laba kun ku dhaw oo aan shaqo qaranka u qabane hawl-gab ah oo soo shaqeeyay, sidoo kale waxa jooga dhalinyaro badan oo aqoonyahan ah oo aan shaqo helin, waxaad moodaa ra'yiga mudanayaasha anigoo aad u ixtiraamaya inuu ra'yi guud ku salaysan yahay ee aanay xeerka soo akhriyin, xeerka hadaad akhrido wax badan baa ku jira gudaha, dhaqaala loogu talagay cid baa u maamulaysa oo loo xilsaarayaa, waxaan soo jeedinayaa inay Mudanayaashu soo akhriyaan Xeerka oo aad uga soo baaraan degaano.

Waxa kale oo aan tilmaamaya xeerku waa mashruuc sharci oo markuu inaga baxo guurtidu marayaa, guurtidu muday haysanayaa, laguma cabiri karo arrin siyaasadeed iyo doorasha hada socota eh, wakhti buu qaadanayaa inuu dhaqangalo, inay waxay umada samaynayanaa xeer anfaca oo u talon, waxaan runtii codsanayaa in doodda laga qayb-qaato, waxa kale oo runtii muhiim u arkaa in Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha loo yeedho oo su'aalo dheeraada la wadyiiyo waan ka hawl-galaynaa shir-gudoon ahaan, inay dadna hawl-gab noqdaan dadna shaqeeyaan baa runtii loo baahan yahay, siday u hawl-gabayaan iyo siday fare u noqonayso iyo dhaqaalaha la siinayo inagoo tamarteena og, kuwa hawl-gabka ahna waxa la siinayaa kuwa cusubna waa la shaqaalaysiinayaa, taas qudheeduna waa culays oo dhaqaalaha wadankeena waynu ku xisaabtaymaynaa.

Marka Xeerka aad ha loo soo akhriyo, aad baad u mahadsan tihiin, fadhiguna wuu inoo xidhan yahay.

**Cawad Cali Maxamed**
**Ag. W. Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal qoraalka**
**-----------------------------------------------**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha G. ee Golaha Wakiilladda JSI**
**--------------------------------------**